

JAMHUURIYADDA
SOMALILAND



REPUBLIC OF
SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند

Sannadkii 13aad

Cadad Gaar ah

Tariikhda Daabacada
27/04/2024

FAAFINTA RASMIGA AH EE
SADDEX BILOOD-LAHA AH
JANUARY TO MARCH

Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web: www.garyaqaankaguud.com

Lama iibin karo
Not for sale

Sannadka 2024



TUSMADA CADADKA

QAYBTA KOWAAD: XEERARKA BAARLAMAANKA,
HESHIISYADA CAALAMIGA AH IYO MIISAANI YADDA

QARANKA:

- 1- Xeerka Guud ee Doorashooyinka Qaranka
Iyo Diiwaangalinta Cod-Bixiyayaasha
XeerLr,91/2023
- 2- Xeerka Nidaamka Ururada iyo Axaabta
Siyaasadda Xeer 14/2023.

QAYBTA LABAAD: XEER MADAXWEYNE:

- | | | |
|-----|---|----|
| 1. | WAREEGTO MADAXWEYNE
Cafis | |
| 2. | XEER MADAXWEYNE
W/X/xoolaha & H. Reermiyiga | 1 |
| 3. | XEER MADAXWEYNE
W/Kalumaysiga & H. Xeebaha | 3 |
| 4. | WAREEGTO MADAXWEYNE
Wareegto Madaxweyne | 8 |
| 5. | WAREEGTO MADAXWEYNE
Kaabis iyo waxka bedel | 13 |
| 6. | WAREEGTO MADAXWEYNE
Kaabis iyo waxka bedel | 15 |
| 7. | WAREEGTO MADAXWEYNE
Wareegto Madaxweyne | 16 |
| 8. | WAREEGTO MADAXWEYNE
Xilka qaadis | 17 |
| 9. | WAREEGTO MADAXWEYNE
Magcaabid | 18 |
| 10. | WAREEGTO MADAXWEYNE
Magacaabid | 19 |
| 11. | WAREEGTO MADAXWEYNE
Xilka qaadis | 20 |
| 12. | WAREEGTO MADAXWEYNE
Magacaabid | 21 |
| 13. | WAREEGTO MADAXWEYNE
Xilka qaadis | 22 |
| 14. | WAREEGTO MADAXWEYNE
Magcaabid | 23 |
| 15. | WAREEGTO MADAXWEYNE
Magacaabid | 24 |
| 16. | WAREEGTO MADAXWEYNE
Magacaabid | 25 |
| 17. | WAREEGTO MADAXWEYNE
Magacaabid | 26 |



18.	WAREEGTO MADAXWEYNE Magacaabid	27
19.	WAREEGTO MADAXWEYNE Ku-dhaqmid Miisaaniyada 2023	28
20.	WAREEGTO MADAXWEYNE Xilka qaadis	29
21.	WAREEGTO MADAXWEYNE Xilka qaadis	30
22.	WAREEGTO MADAXWEYNE Magcaabid	31
23.	WAREEGTO MADAXWEYNE Magcaabid	32
		33
QAYBTA SADEXAAD: XEER NIDAAMIYAYAASHA WASAARADAHA, XEERARKA GOLAYAASHA DEEGAANKA, NATIJOYINKA DOORASHOYINKA & BARNAAMIYADA DAWLADA:		
SOOMA BIXIN		
QAYBTA AFRAAD: GO'AANADA MAAMUL & QARAARADA:		
8.	SOOMA BIXIN	
QAYBTA SHANAAD: AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:		
9.	SOOMA BIXIN	



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-1144/012024

Taar: 08/01/2024

Wareegto Madaxweyne Cafis

Markaan Arkay: Qodobka 90^{aad} faqradiisa 5^{aad} ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qoraalka Taliska Guud ee Ciidanka Asluubta ee summaddiisu tahay TCA/G-1/09/2024; kuna Taariikhaysan 07/01/2024, Ujeeddadiisuna tahay Soo-gudbin Liisaska Maxaabiista Cafiska galaya sanadkan 2024-ka;

Markaan Arkay: Soo-jeedinta Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ee Summaddiisu tahay XIG/JSL/02/2024 kuna Taariikhaysan 07/01/2024;

Markaan La -tashaday: Hay'adaha ay khusayso;

Waxaan Go'aamiyey:

In laga bilaabo taariikhda maanta aan Cafis Guud u fidiyo maxaabiista dembiyada fudud ku xukuman ee Xabsiyada Dalka ku xidhan, oo tiradoodu Dhan tahay 376 (Saddex Boqol iyo Lix Iyo Todobaatan) Maxbuus. Cafiskani saamayn kuma laha xuquuqda madaniga ah iyo raadka ciqaabeed ee ka-dhalanay




demiyaada ay ku xukunnaayeen. Waxa caafiskan fulinaya Xarnta
Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, iyada oo la raacayo liiska
Maxaabiista ee halkan ku lifaaqan.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XM/249-1145/012024

Taar: 13/01/2024

Xeer Madaxweyne Lr.23/012024

Wasaaradda Xannaanada Xoolaha Iyo Horumarinta Reer- miyiga

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobka 18aad ee Xeer Lr.71/2015 oo
qeexaya in Madaxweynaha Jamhuuriyadda
Somaaliland, isaga oo isticmaalaya
awooddiisa Xeereed uu u qoondaynayo
Xukuumadda iyo laamaheeda
shaqooyinka, iyadoo la tix-galinayo
muhiimadda ay shaqadu u leedahay
xukuumadda iyo xaqijinta in xilalka laysku
raaciyu hab la maamuli karo oo ku dhisan
baaxadda shaqada ;

Markaan Arkay: Muhiimadda ay leedahay in xukuumaddu
ay yeelato wasaaradaha lagama-
maarmaanka u ah xil-gudashooda,
iyadoo loo qabanayo hannaan ay u
qorshayn karaan, una fulin karaan
shaqooyinkooga si waafaqsan Qodobka
26aad Xeer Lr: 71/2015;



Markaan dersay:

deder-gelinta Hawlaha Horumarinta Reer miyigu muhiimadda ay u leeyihiin koboca dhaqaalaha iyo la dagaalanka saboolnimada, maadaama bulshada inteeda badani ay deggan tahay dhulka miyiga ah, sidoo kalena nolosha dhaqan-dhaqaale ee bulshada inteeda kale ay ku tiirsan tahay wax-soo-saarka Reer miyiga;

Waxaan Soo-saaray:

Lifaaqa 5aad ee Kaabista iyo wax-ka-beddelka xeer-nidaamiyaha Dhismaha Wasaaradaha iyo Ha'yadaha Xukuumadda Xeer Nidaamiye Lr. 01/2018.oo ah sidan hoos ku xusan;

- 1) Wasaaraddii hore ee Xannaada Xoolaha iyo Horumarinta Kalluumaysiga ee ku xusan Qodobka 4aad, Faqraddiisa 17aad iyo Qodobka 5aad; Faqraddiisa 1aad, ee Xeer Nidaamiye Lr.01/2018 waxaa loo beddelay:
Wasaaradda Xannaanada Xoolaha iyo Horumarinta Reer-Miyiga;
- 2) Xilkii iyo Waajibbaadkii Wasaaraddii hore ee Horumarinta Reer- miyiga ee ku xusan Xeer madaxweyne Lr;14/112021, waxaa lagu wareejiyey Wasaaradda Xannaanada Xoolaha iyo Horumarinta Reer-miyiga;
- 3) Qodobka 21aad ee Xeer-nidaamiye Lr.01/2018 ee la xidhiidhay awoodaha iyo shaqooyinka Wasaaraddii hore ee Xannaanada Xoolaha iyo Horumarinta Kalluumaysiga waxaa lagu sameeyey wax-ka-bedel iyo kaabis waxaana u noqonayaa sidan Hoos ku xusan.

Qodobka 21aad:

Wasaaradda Xannaanada Xoolaha iyo Horumarinta Reer-Miyiga



Iyadoo gudanaysa xilka xukuumadda ka saaran wax-soo-saarka xoolaha nool isla markaana dhawraysa muhiimadda ista-tijiyadeed ee xoolaha nooli u leeyahay dhaqaalaha dalka, Wasaaradda Xannaanada Xoolaha iyo Horumarinta Reer miyigu waxay yeelanaysaa awoodahan iyo shaqooyinkan soo socda:

1. Curinta sharciyo, xeer-nidaamiyeyaal, siyaasado iyo hal-beegyo lagu horumarinayo khayraadka xoolaha iyo ka faa'iidaysigooda;
2. Dejinta siyaasadaha iyo qorshe hawleedyada lagu ilaalinayo, isla markaana lagu horumarinayo caafimaadka Xoolaha iyo tayaynta wax-soo-saarka xoolaha;
3. Dhiiri-gelinta fursadaha Maal-gashi ee adeegyada xoolaha;
4. Xidhiidhinta hay'adaha maxalliga ah iyo kuwa heer calami ee ku hawlan horumarinta iyo ka faa'iidaysiga khayraadk xoolaha, iyada oo la siinayo taageero farsamo.
5. Diyaarinta iyo hir-gelinta nidaamka ka-hor-tagga dhoofinta xoolaha dheddig.
6. Xaqiijinta ka-hortagga iyo xakamaynta cudurada xoolaha ee xuduudaha isaga tallaaba;
7. Hir-gelinta iyo kor-u-qaadista tayada maxjarada, xero-guullada (holding Grounds) iyo rugaha caafimaadka xoolaha gaar ahaan kuwa xuduudaha;
8. Daryeelka iyo kobcinta xoolaha nool iyo wixii ka soo baxa sida, Cadka, Caanaha, Subagga, Saamaha iyo Hargaha;
9. Shahaado-siinta caafimaad-qabka, dhoofinta iyo isticmaalka gudaha ee xoolaha iyo wixii laga soo saaro;
10. Kobcinta xirfadda xoolo-dhaqatada, shirkadaha maal-gashada xoolaha iyo cid kasta oo ku hawlan wax-soo-saar;
11. Kobcinta awoodda cid kasta oo ka ganacsata xoolaha, si loo xaqiijiyo inuu wax-soo-saarkoodu dabool baahida suuqa ganacsiga, lana dhiso nidaam lagu ilaalinayo tayada wax-soo-saarkooda;



12. Dhismaha nidaam xaqiijinaya adeegyada caafimaadka xoolaha oo tayo leh si kor loogu qaado ka-hortagga iyo xakamaynta cudurada xoolaha;
13. Dejinta nidaamyada lagu suuq gaynayo wax-soo-saarka xoolaha;
14. Ilaalinta tayada dawooyinka xoolaha, iyo tayada adeegyada caafimaadka xoolaha;
15. Dejinta nidaam lagu xaqiijinayo is-dhex-galka iyo isku xidhka daneeyayaasha ku hawlan cilmi baadhista xoolaha;
16. Diyaarinta iyo hirgelinta siyaasad Qaran oo la xidhiidha horumarinta reer miyiga Jamhuuriyadda Soomaaliland;
17. Abuuridda qorshayaal ku wajahan kor u qaadidda iyo daryeelka hab-nololeedka Bulshada Reer-miyiga ah;
18. Daraaseynta iyo soo-bandhigidda hindise-cilmiyeed lagu hormarinayo nololaha bulshada reer miyiga ah, iyada oo la ogaanayo caqabadaha iyo baahiyaha, soona jeedinaysa xalka suuratogalka ah ee kor loogu qaadayo fursadaha Reer-miyiga;
19. Ka-hawl galidda iyo fuddaynta in adeegyada aasaasiga ah ee arrimaha bulshadu ay gaadhaan Bulshada Reer-miyiga ah;
20. Horumarinta iyo kor-u-qaadidda xaaladda nololeed ee Bulshada Reer miyiga ah si loo cidhib-tiro saboolnimada korna loogu qaado dhaqaalaha bulshada;
21. Taageeridda iyo ka hawl-gelidda sidii loo heli lahaa tabo barro loogu talo galay in lagu dhiso awoodaha iyo xirfadaha Bulshada Ree-miyiga ah;
22. Hir-gelinta Hannaanka ka qayb-qaadashada iyo abuuridda lahaanshaha ee mashaariicda iyo barnaamijyada Bulshada Reer-miyiga;
23. Isku-duwidda iyo ka war-bixinta barnaamijyada iyo mashaariicda horumarinta Reer-miyiga;



24. Kor-u-qaadista amniga wada-jirka, waxa-wada - lahaanshaha iyo iskaashiga Bulshada reer-miyiga ah, si looga-hor-tago colaadaha ka yimaadda dhul daaqsimeedka, biyaha IWM;
25. Fulinta xilalka iyo waajibaadyada kale ee ay u xil-saraan Xeerarka Dalku;

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XM/249-1146/012024

Taar: 13/01/2024

Xeer Madaxweyne Lr.24/012024

Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Horumarinta Xeebaha

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobka 18aad ee Xeer Lr.71/2015 oo qeexaya in Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaaliland, isaga oo isticmaalaya awooddiisa Xeereed uu u qoondaynayo Xukuumadda iyo Laamaheeda shaqooyininka, iyadoo la tix-galinayo muhimadda ay shaqadu u leedahay xukuumadda iyo xaqiijinta in xilalka laysku raaciyu hab la maamuli karo oo ku dhisan baaxadda shaqada ;

Markaan Arkay: Muhiimadda ay leedahay in xukumaddu ay yeelato wasaaradaha lagama-maarmaanka u ah xil-gudashadooda, iyadoo loo qaabanayo hannaan ay u qorshayn karaan, una fulin karaan shaqooyinkooga si waafaqsan Qodobka 26aad xeer Lr:71/2015;

Markaan dersay: Deder-gelinta Hawlaha Barnaamijyada wax-soo-saarka Kalluumaysiga iyo kor u



qaadidda hannaanka lagu hormariyo xirfadaha Kalluumaysatada dalka si looga faa'iidaysto khayraadka badda.

Waxaan soo - saaray:

Lifaaqa 6aad ee Kaabista iyo wax-ka- beddelka qodobka 4aad Faqraddiisa 17aad iyo **qodobka** 21aad ee xeer-nidaamiyaha Dhismaha Wasaaradaha iyo Ha'yadaha Xukuumadda ee Xeer Nidaamiye Lr. 01/2018.oo ah sidan hoos ku xusan;

1. Wasaaraddii hore ee Horumarinta Reer-miyiga ee ku xusan Xeer Madaxweyne Lr; 14/112021, summaddiisu tahay Sum;JSL/XM/XM/249-784/112021 kuna taariikhaysan 10/11/2021 waxaa loo bedelay **Wasaaradda kalluumaysiga iyo Xeebaha** ;
2. Xilkii iyo waajibaadkii wasaaraddii hore ee xannaanada Xoolaha iyo Horumarinta Kalluumaysiga ee ku xusan Qodobka 21aad ee Xeer Nidaamiye Lr.01/2018 qaybihii khuseeyey kalluumaysiga waxaa lagu wareejiyey **Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Horumarinta Xeebaha**;
3. Waxaa lagu soo daray qodob cusub oo noqonaya Qodobka 34aad ee xeer nidaamiye Lr.01/2018, oo qeexaya xilka iyo waajibaadka **Wasaaradda Kalluumaysiga Iyo Horumarinta Xeebaha** oo u dhigan sida hoos ku xusan;

Qodobka 34aad:

Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Horumarinta Xeebaha;

Iyadoo gudanaysa xilka xukuumadda ka saaran horumarinta Kalluumaysiga iyo ka faa'iidaydiga khayraadka badda, xilka iyo



waajibaadka **Wasaarada Kalluumaysiga iyo Horumarinta**

Xeebaha wuxuu noqonayaa sidan hoos ku xusan;

- 1) Dejinta siyaasadaha iyo istraatijiyadaha ku saabsan horumarinta ilaalinta iyo ka faa'iidaydiga khayraadka kalluumaysiga iyo kormeeridda fulintooda;
- 2) Soo-diyaarinta Xee-nidaamiyeyaasha iyo hab - raacyada lagu horumarinayo kalluumaysiga iyo khayraadka badda, sidoo kalena lagu hir-gelinayo xeerka Kalluumaysiga Jamhuuriyadda Somaliland;
- 3) Bixinta ruqsadaha kalluumaysiga ee Maraakiibta Kalluumaysiga Shisheeye iyo kuwa wadaniga ah si waafaqsan xeerka kalluumaysiga iyo xeer-nidaamiyeyaasha ka farcama.
- 4) Dhiiri-gelinta iyo horumarinta nidaamka dhaqaale ee fursadaha maal-gashiga iyo suq-geynta ganacsiga Kalluumaysiga Dalka Gudahiisa iyo ganacsiga kalluumaysiga dalka debediisa loo dhoofiyo;
- 5) Dhiiri-gelinta maalgashiga wax-soo-saarka khayraadka badda iyo Kalluumaysiga, si uu maal-gashigaasi uga qayb-qaato koboca dhaqaalaha bulshada ku nool xeebaha dalka;
- 6) Dhiiri-gelinta horumarka tiknoolajiyadda la xidhiidha kalluumaysiga si loo horumariyo tayada iyo tirada wax-soo-saarka Kalluumaysiga;
- 7) Kobcinta iyo xoojinta hannaanka farsamo ee lagu hormariyo xirfadaha kalluumaysatada iyo iskaashatooyinka



ku hawlan wax-soo-saarka kalluunka si kor loogu qaado wax-soo- saarka kalluunka;

- 8) Xidhiidhinta hay'adaha maxalliga ah iyo kuwa heer caalami ee ku hawlan horumarinta iyo ka faa'iidaysiga khayraadka kalluunka, iyada oo la siinaayo taageero farsamo;
- 9) Dejinta iyo hir-gelinta nidaam lagu xakamaynayo isla markaana lagaga hor-tegayo kalluumaysiga sharci-darrada ah;
- 10) Dhiiri-gelinta habka dhaqan ee kalluumaysiga iyo dhiyaarinta halbeegyo la xidhiidha fariimaha wacyi-gelinta bulshada ee wax-soo-saarka kalluumaysiga iyo ka faa'iidaysiga khayraadka badda;
- 11) Dardar-gelinta horumarka dhaqaale ee bulshada ku nool xeebaha , iyada oo loo marayo ku jihaynta wax-soo-saarka iyo ka faa'iidaysiga kalluumaysiga iyo khayraadka badda;
- 12) Ilaalinta iyo daryeelka noolaha badda ee ku nool goobaha seerayaasha kaydka badda ee ay ku dhalaan, ayna dhigtaan ugxanta noolaha baddu iyo dhagxaanta shacaabiga xeebaha dalka ee hoyga u ah dhir iyo kalluum ay qaar ka mid ahi nadir ku yihiin dunida.
- 13) Diyaarinta warbixin cilmiyeedyo la xidhiidha kaluumaysiga iyo heerka kalluumaysiga dalka taas oo wax ka taraysa horumarinta heerka kalluumaysiga dalka.
- 14) Daraasaynta iyo ururinta macluumaadka khayraadka badda iyo kalluumaysiga iyo faafinta macluumaadka noocyada kala duwan ee Kalluunka iyo khayraadka badda;



- 15) Diyaarinta cilmi-baadhisyo la xidhiidha Kalluumaysiga noolaha kale ee badda;
- 16) Qiimaynta iyo la socodka fulinta siyaasadaha ku saabsan ilaalinta, maaraynta iyo ka faa'iidayiga dhammaan khayraadka kalluumaysiga si waafaqsan xeerka kalluumaysiga jamhuuriyadda Somaaliland;
- 17) Xaqiijinta noolaha badda iyo khayraadka xeebaha iyada oo laga ilaalinayo wax kasta oo khatar gelin kara;
- 18) Xilka iy waajibaadka kale ee ay u xil-saraan Xeerarka Dalku;

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-1147/012024

Taar:13/01/2024

Wareegto Madaxweyne

Dhaqan-galka Siyaasadda Daryeelka Bulshada Jamhuuriyadda Somaliland

Markaan Arkay:

Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay:

Muhimadda ay siyaasadda Daryeelka Bulshada jamhuuriyadda Somaliland u Leedahay Dhismaha Qaranka iyo Horumarinta Daryeelka Bulshada;

Markaan Arkay:

Soo-jeedinta Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Summaddiisu tahay Tix/GGQ/GG/06/2024, kuna taariikahaysan 12/01/2024; ujeedadiisuna tahay Codsiga Dhaqan-galinta Siyaasadda Daryeelka Bulshada;

Waxaan Soo - saaray;



Wareegtadan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Siyaasadda
Daryeelka Bulshada Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/GW/081-1148/012024

Taar:14/01/2024

Ku: Guddoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

Hargeysa

Ujeedo: Kaabista iyo Wax-ka- bedelka Xeerka Xannaanada
Xoolaha Xeer Lr.34/2023

Mudane,

Waxaan halkan kuugu soo gudbinayaa Kaabista iyo Wax-ka-
bedelka Xerka Xannaanada Xoolaha Jamhuuriyadda Somaliland,
Xeer Lr.34/2023, kaas oo Golaha Wasiirradu ku ansixiyeen
Fadhigoodii 121aad ee 14/12/2023.

Sidaa darteed, waxaan idinka rajaynayaa in aad ka gudan
doontaan waajibaadkiina Dastuuriga ah.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/GW/081-1149/012024

Taar: 14/01/2024

Ku: Guddoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

Hargeysa

Ujeedo: Kaabista iyo Wax-ka- bedelka Xeerka Hay'adda
Maaraynta Masiibooyinka iyo kaydka Raashinka Qaranka,
Xeer Lr.35/.2023

Mudane,

Waxaan halkan kuugu soo gudbinayaa Kaabista iyo Wax-ka-
bedelka Xeerka Hay'adda Maaraynta Masiibooyinka iyo Kaydka
Raashinka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland ee Xeer
Lr.34/2023, kaas oo Golaha Wasiiradu ku ansixiyeen
Fadhigoodii 121 aad ee 14/12/2023.

Sidaa darteed, waxaan idinka rajaynayaa in aad ka gudan
doontaan waajibaadkiina Dastuuriga ah.

Allaa Mahad Leh**Muuse Biixi Cabdi****Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.**



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-1150/012024

Taar:14/01/2024

Wareegto Madaxweyne**Dhaqan-galka Siyaasadda Beeraha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland

Markaan Arkay: Muhiimadda ay Siyaasadda
Beeraha Dhismaha Qaranka iyo
Horumarinta Beeraha iyo Beeralayda;

Makaan Tix-geliyey: Go'aanka Golaha Wasiiradu ku ansixiyeen
Siyaasadda Beeraha, Shirkii 117aad ee
Qabsoomay 05/10/2023;

Waxaan Soo - saaray;

Wareegtadan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Siyaasadda
Beeraha Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh**Muuse Biixi Cabdi****Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.**



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-1204/012024

Taar: 25/01/2024

Ku: Muniir Xaaji Cabdillaahi Abusite

**Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga
Caalamiga**

Ujeeddo: Xilka-qaadis

Sida aad la socoto, xilka qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo. sidaa darted, waxaan go'aamiyey in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii Wakiilka Jamhuuriyadda Somaliland ee Dalka Imaaraadka Carabta.

waxaan kaaga mahad-celinayaa mudaddii aad haysay xilka Qaranka..

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-1205/012024

Taar: 25/01/2024

Wareegto Madaxweyne Magcaabid

- Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo
Waayo-aragnimadiisa;
- Markaan Ku Qancay: Inuu Hanankaro masuuliyadda
ka dhalanaysa xilkan
- Markaan Sameeyey: La- tashi;

Waxaan Go'aamiyey;

In Cismaan Maxamed Badmaax laga bilaabo taaiikhda maanta uu
ahaado Wakiilka Jamhuuriyada Somaliland ee Dalka Imaaraadka
Carabta iyo Xidhiidhiyaha Wadammada Khaliijka.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-1206/012024

Taar: 25/01/2024

Wareegto Madaxweyne Magcaabid

- Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo
Waayo-aragnimadiisa;
- Markaan Ku Qancay: Inuu Hanankaro masuuliyadda
ka dhalanaysa xilkan
- Markaan Sameeyey: La- tashi;

Waxaan Go'aamiyey;

In Dr. Rooble Muuse Cabdi Cilmi laga bilaabo taaiikhda maanta uu ahaado Wasiirka Wasaaradda Gaashaan-dhiga ee Jamhuuriyada Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XKQ/222/1-1207/012024

Taar:25/01/2024

Ku: Cabdixakiim Siciid Bustaale

Wasiir-ku xigeenkii Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska

Ujeedo: Xilka-qaadis

Sida aad la socoto, xilka qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, sidaa darted, waxaan ga'aamiyey in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xillkii Wasiirku-xigeenka Wasaaradda Waxbarashada iyo sayniska ee Jamhuuriyadda Soomaliland Waxaan kaaga Mahad-Celinayaa muddadii aad haysey Xilka Qaranka.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-1208/012024

Taar: 25/01/2024

Wareegto Madaxweyne
Magcaabid

- Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo
Waayo-aragnimadiisa;
- Markaan Ku Qancay: Inuu Hanankaro masuuliyadda
ka dhalanaysa xilkan
- Markaan Sameeyey: La- tashi;

Waxaan Go'aamiyey;

In Dr. Maxamuud Yuusuf Cilmi laga bilaabo taaikhda maanta uu ahaado Wasiirku-xigeenka Wasaaradda Waxbarashada iyo sayniska ee Jamhuuriyada Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XKQ/222/1-1226/032024

Taar: 10/03/2024

Ku: Saleebaan Cawad Cali Bukhaari;
Wasiirkii Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka

Ujeedo: Xilka-qaadis

Mudane,

Sida aad la socoto, xilka qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo oo hadba loo igmado cidii hanankarta. sidaa darted, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xillkii aad hore u haysay.

Waxaan kaaga Mahad-Celinayaa muddadii aad haysey Xilka Qaranka.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-1227/032024

Taar: 10/03/2024

Wareegto Madaxweyne Magcaabid

- Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo
Waayo-aragnimadiisa;
- Markaan Ku Qancay: Inuu Hanankaro masuuliyadda
ka dhalanaysa xilkan
- Markaan Sameeyey: La- tashi;

Waxaan Go'aamiyey;

In Raabi Cabdi Maxamed Maxamuud laga bilaabo taaiikhda maanta uu ahaado Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka iyo horumarinta Jidadka Jamhuuriyada Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-1228/032024

Taar: 10/03/2024

Wareegto Madaxweyne Magcaabid

- Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo
Waayo-aragnimadiisa;
- Markaan Ku Qancay: Inuu Hanankaro masuuliyadda
ka dhalanaysa xilkan
- Markaan Sameeyey: La- tashi;

Waxaan Go'aamiyey;

In Maxamuud Warsame Jaamac Cali laga bilaabo taaiikhda maanta uu ahaado Wasiirka Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Horumarinta Xeebaha Jamhuuriyada Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-1229/032024

Taar: 10/03/2024

Wareegto Madaxweyne Magcaabid

- Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo
Waayo-aragnimadiisa;
- Markaan Ku Qancay: Inuu Hanankaro masuuliyadda
ka dhalanaysa xilkan
- Markaan Sameeyey: La- tashi;

Waxaan Go'aamiyey;

In Muuse Ibraahim Yuusuf Salaf laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka Jamhuuriyada Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-1230/032024

Taar: 10/03/2024

Wareegto Madaxweyne Magcaabid

- Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo
Waayo-aragnimadiisa;
- Markaan Ku Qancay: Inuu Hanankaro masuuliyadda
ka dhalanaysa xilkan
- Markaan Sameeyey: La- tashi;

Waxaan Go'aamiyey;

In Cabdinaasir Caydiid Maxamed Faarax laga bilaabo taaiikhda maanta uu ahaado Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Horumarinta Beeraha Jamhuuriyada Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-1231/032024

Taar: 10/03/2024

Wareegto Madaxweyne Magcaabid

- Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo
Waayo-aragnimadiisa;
- Markaan Ku Qancay: Inuu Hanankaro masuuliyadda
ka dhalanaysa xilkan
- Markaan Sameeyey: La- tashi;

Waxaan Go'aamiyey;

In Faysal Maxamuud Siciid Cabdulle laga bilaabo taaiikhda maanta uu ahaado Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Ganacsiga iyo Dalxiiska Jamhuuriyada Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-1237/032024

Taar: 18/03/2024

Wareegto Madaxweyne Ku-dhaqmid Miisaaniyadda Sannadeedkii 2023-ka

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobka 55aad Farqadiisa 2aad
ee Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markaan Darsay: Xeerka Maamulka Maaliyadda
ee Xeer Lr.75/2016

Waxaan Go'aamiyey;

In lagu Dhaqmo Miisaaniyaddii Sannadkii 2023-ka, oo ka kooban Miisaaniyadda Dawladda Dhexe, Dawladaha Hoose, Ha'yadaha Madaxa-banaan iyo Deeqaha Caalamiga ah oo dhan SL.SH/=3,581,440,706,340/= (Sadex Tirilyan, Shan Boqol Kow iyo Siddeetan Biliyan, Afarboqol iyo Afartan Milyan, Toddoba Boqol iyo Lix Kun, Saddex Boqol iyo Afartan Shilling Somaliland ah) Miisaaniyaddu waxay dhaqan-gal noqon doontaa 19 march 2024.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-1237/032024

Taar: 19/03/2024

Ku: Maxamed Nuur Cabdi;
Guddoomiye ku-xigeenkii Gobolka Togdheer
Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha

Ujeedo: Xilka-qaadis

Mudane,

Sida aad la socoto, xilka qaranka ayey sunihiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo ignado cidii hanankarta. sidaa darted, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xillkii aad u haysay Qaranka.

Waxaan kaaga Mahad-Celinayaa muddadii aad haysey Xilka Qaranka.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XKQ//222/1-1238/032024

Taar:13/03/2024

Ku: Mukhtar Cabdi Cabdilaahi;
Guddoomiyihii Gobolka Daad-madheedh
Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha

Ujeedo: Xilka-qaadis

Mudane,

Sida aad la socoto, xilka qaranka ayey sunihiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadba loo ignado cidii hanankarta. sidaa darted, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xillkii aad u haysay Qaranka.

Waxaan kaaga Mahad-Celinayaa muddadii aad haysey Xilka Qaranka.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-1239/032024

Taar: 19/03/2024

Wareegto Madaxweyne Magcaabid

- Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo
Waayo-aragnimadiisa;
- Markaan Ku Qancay: Inuu Hanankaro masuuliyadda
ka dhalanaysa xilkan
- Markaan Sameeyey: La- tashi;

Waxaan Go'aamiyey;

In Cabdi Xiis Yuusuf laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado
Gudoomiye ku-xigeenka Gobolka Togdheer ee Jamhuuriyada
Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-1240/032024

Taar: 19/03/2024

Wareegto Madaxweyne Magcaabid

- Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo
Waayo-aragnimadiisa;
- Markaan Ku Qancay: Inuu Hanankaro masuuliyadda
ka dhalanaysa xilkan
- Markaan Sameeyey: La- tashi;

Waxaan Go'aamiyey;

In Cabdiraxiim Maxamed Axmed laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiyaha Gobolka Daad-madheedh ee Jamhuuriyada Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland